



“TLR” Xadidaadaha Waqtiga SNAP La Qaadan Karo ee Dadka Waaweyn ee kaligood ah oo aan cid Kale Mas’uul ka ahayn (Horey loogu aqoon jiray ABAWDs)

“ABAWD” SNAP Time Limits for Single Adults without Dependents

Ogow: Xadidaadahii waqtiga SNAP waxay dib u bilowdeen bishii Luulyo 1, 2023.

DIGTOONI (FEEJIGNAAN)!!

Haddii aad tahay **hoy la’aan ama halgamaa**, waxa aad heli kartaa cuntadda cayrta (food stumps) iyadoo lahayn waqti xadidaad ah.

U sheeg xafiiska deegaankaaga ee degmadda haddii aad noqoto hoy la’aan ama aad tahay halgamaa.

Waa ayo LTR?

TLR waxa ay u taagan tahay “Helaha Waqtiga Xadidan.” Waxaa markii hore loogu yeeri jiray “Dadka Waaweyn ee Jir Ahaan Fayow ee aan Cidna Mas’uul ka Ahayn (ABAWD).” Waa qofka weyn oo da’diisu u dhaxayso 18 ilaa 52 sanno, oo aan curyaan ahayn, uur lahayn, aan jirranayn, oo aan ku noolayn hooy ay ku noolyihiin caruur. Dadka ka yar 18 sanno ama ka weyn 52 sanno iyo wax ka badan ma aha TLRs.

Haddaad tahay TLR, waxaad heli kartaa Gargaarka Cuntada (SNAP) 12 bilood oo keliya muddo u dhexeysa 36 bilood gudohhod, haddii aadan ahayn qof shaqeeya, ama dugsi aada, iskaa wax u qabso ku shaqeeya, ama ku suggan xaalad gaar ah. Haddaad tahay TLR, iskaa wax u qabso waad kaga qayb geli kartaa banaamijyada tababarada, oo ay ku jirto GED, ESL ama fasalada waxbarashada dadka waaweyn (ABE).



Waa maxay sharciyada shaqo ee la xiriira TLR oo aad ku heli karto Gargaar Cunto (SNAP) oo ka badan 12 bilood?

Waa in aad:

- Shaqaynaysay, ama aad samaynaysay shaqo iskaa wax u qabso ah muddo 20 saac asbuucii/ 80 saac bishii AMA
- Aad qabanaysay shaqo la xiriirta Gargaarka Cuntada (SNAP) iyo tababar ama aad ku jirtay barnaamijka howlgelinta qasabka ah muddo 27 saacadood bishii.

Maxaa la rajayn (filan) karaa?

Gargaarka Cuntada (SNAP) ee ku siman 12- bilood kuma khuseeyo haddii :

- Da’daadu ka yartahay 18 sanno, ama ka weyntahay 52 sanno iyo ka badan.
- Ma jirtaa 24 ama ma ka yar tahay mana la noolayd dadka aan qoyskaaga ahayn kolkii aad 18-sanno jirsatay
- Horey ma uga mid noqotay Ciidanka Mareykanka (U.S.)
- Aadan shaqayn Karin 20 saacadood ama ka badan todobaadkii sababo la xiriira awood darro (tabar darro), dhibaato xagga maskaxda ah oo laga yaabo in aadan ka soo bogsan Karin ugu yaraan 30 maalmood gudahood. Aadan hoy hoy.
- Haddii aad xanaanaynayso ilmo ka yar 18 (**Khasab ma** aha in aad waalid u tahay ilmaha)
- Haddii aad qaadatid Gargaarka Guud (GA), ama dakhliga badbaada ee dheeriga ah (SSI) ama dakhliga badbaada bulshada curyaanka ah (SSDI) ama dakhliga Gargaarka Dheeriga ah ee Minnesota (MSA)
- Haddii aad qaadatid dakhliga shaqa la’aanta (shaqa beelka)
- Haddii aad uur leedahay
- Haddii aad gurigaaga ku xanaanayso qof jirran ama curyaan ah
- Haddii aad wado waxbarasho aad ka qaadanayso dugsi la aqoonsanyahay ama barnaamij tababar ah ugu yaraan nus waqtigaaga ka mid ah.
- Haddii aad ku jirto barnaamij baxnaanin ah ee la xiriira maandooriye ama khamro.
- Haddii aad arji u qoratay Kabitaanka Dakhliga ee dheeriga ah (SSI), arjigaagana aan weli laga soo jawaabin.
- Haddii lagu siiyo adeeg baxnaaninta (Dhaqan celis) (DVR)
- Haddii lagu siiyo adeegga curyaamada aan waxba laga qaban karin (DD)

Dib u helida Gargaarkaagi Cunnada

Maadaama sharciyadii isbedeleen, waxaa suurta gal ah in aad dhaqso dib ugu hesho faa’iidada (waxtark) Gargaarka Cunnada (SNAP). Kala hadal xafiiska degmadaada sidii aad dib ugu heli lahayd Gargaarki Cuntada.

Haddii sharciyada shaqadu adiga ku khuseeyaan . . .


Waxaad dooran kartaa 12ka bilood ee ka mid ah 36 bilood (3 sanno) ee aad qaadan lahayd Gargaarka Cuntada (SNAP). Bil kasta oo aad qaadato Gargaar ka yar intii aad bil buuxda qaadan lahayd, laguma xisaabinaayo bilaahaaga wax ku tirsan. Arrin tanni waxay dhici kartaa marka aad Gargaarka codsato bisha kowdeeda ka dib ama aadan buuxin shuruudihii ku xirnaa maalmo ka mid ah bishaas. Haddii qof ka mid ah inta isku guri ku nool uusan helin Gargaarka Cuntada sabab la xiriirta waqtiga la xadiday, inta kale ee gurigaas ku nool way heli karaan Gargaarka Cuntada (SNAP).



Maxaa dhici kara haddii aanan ku raacsaneyn go'aanka degmada?

Haddii aad weydid Gargaarka Cuntada (SNAP) sabab la xiriirta sharciga shaqo, ama lagu sheego in aad dhamaysatay mudadii bilaha aheyd ee lagu ogolaa, laakiin aadan ku raacsanayn go'aankaas, waxaad markiiba codsataa racfaan (dib u eegid). Haddii aad codsato racfaan muddo 10 maalmood gudohood ah, weli waxaad heli kartaa Gargaarka Cunto (SNAP) inta racfaanka lagu jiro.

Codsiga racfaanka (dib u eegidda), waxaad warqad u dhiibtaa qofka haya dacwadaada oo aad ku sheegayso sababta diidmada iyo taariikha diidmada, nuqul (koobi) kala har. Ama, waxa aad booqan kartaa [buuxinta iyo soo gudbinta foomka racfaan ka qaadashada](https://mn.gov/dhs/). Soo booq: <https://mn.gov/dhs/>.



- Guji halka “See u sameeyaa” Sanduuqa dusha saree e bogga
- Hoos “Raadi” Riix “edocs and forms”
- Guji luqadaada
- Garaac 0033 barta raadinta

Waxaa kaloo jira tilmaan bixin. Haddaad rabto in aad akhrido. Si taxadar leh u akhri foomka, buuxi si dhamaystiran waxa lagu weydiiyay, dabadeedna riix halka ay ku qoran tahay “ Gudbi” dhanka midig ee hoose. Waxaa haboon in aad koobi ka daabacato.

Ka fiiri bogga xaqiiqooyinka [Racfaan U Qaadashada DHS](#) faahfaahin intaas kabadan. Ka wac xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee deegaankaaga 1-(877) 696-6529 haddii aad caawino u baahan tahay.

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalan xogtan urursan haddii ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.